VästKom

VÄSTRA GÖTALANDSREGIONEN

# Shuruudaha loogu talagalay adiga amaahanaaya qalab gargaar

Qalabka gargaarka waa mid shaqsi loo qoray oona si shaqsi ah lagugu tijaabiyay iyadoo laga duulaya baahiyahaaga. Qalabka gargaarka ee aad amaahan karto waxaa iska leh mas'uulka guud ee daryeelka caafimaadka waxaana diiwaanka caafimaadka ku diiwaan gelinaya daryeel-bixiyaha caafimaadka. La xidhiidh bixiyahaaga daryeelka caafimaadka wixii macluumaad dheeraad ah.

Qalab bixiyuhu waa qofka ka tirsan daryeelka caafimaadka kaas oo qiimeynaya baahidaada, tijaabinaya lana soconaya sida qalabka gargaarku u shaqeysano. Qalab bixiyuhu waxa uu xaq u leeyahay in uu sameeyo dabagal iyo qiimayn cusub oo la xariirta baahiyaha, tusaale ahaan haddii xaaladaada caafimaad ama xaaladaada degaaneed ay isbedelaan, haddi aadan u isticmaalin qalabka garkaarka si waafaqsan hab-raacyada iyo tusmooyinka ama haddii xeerarka khuseeya arrimahaan ay isbedelaan. Qiimaynta ayaa laga yaabaa inay u horseeddo qalab bixiyuhu inuu beddelo qalabka gargaarka ama  in ayba dhammato bixinta qalabka. Markaa waa inaad soo celisaa qalabka gargaarka.

**Waxaa waajib kugu ah inaad raacdo hab-raaca isticmaalka iyo hab-raacyada qalab bixiyuhu kuu qoray**

- Waa inaad isticmaashaa, ilaalisaa oo aad nadiifisaa qalabkaaga gargaarka iyadoo la raacayo tilmaamaha isticmaalka iyo tilmaanta gaarka ah ee qalab bixiyuhu si uu qalabka gargaarku si sax ah ugu shaqeeyo.
- Waa inaad u kaydisaa qalabkaaga gargaarka si aanay dadka aan loo oggolayn u heli karin. Meelaha ay dad badani joogaan, qalabka gargaarka waa in indhaha lagu hayaa ama furo lagu xiro.
- Laguuma oggola faragelin la xariirta qalabka gargaarka, kuma rakibi kartid qaybo qalab oo kuu gaar ah mana waxyeelleyn kartid qalab soo amaahatay.
- Qalabka (oo uu kujiro software-ka), qalabyada dheeraadka ah ama qalabyada garkaarka ee gaarka loo leeyahay lagama oggola in lagu dul rakibo ama lagu daro qalabyada lasoo amaahday.
- Ma amaahin kartid qalabka gargaarka dad kale, ma bixin kartid mana ka iibin kartid qof kale.

**Haddii qalabka gargaarku u baahan yahay dayactir**

Had iyo jeer la xiriir alaab-qeybiyaha/qeybiyaha ama qaybta maamul ee hoos ku qoran haddii qalabkaaga gargaarka u baahan yahay dayactir. Ha isticmaalin qalabka haddii aad u malaynayso in khaladku uu saamayn ku yeelan karo ammaanka. Haddii arrintu degdeg tahay, la xidhiidh qaybta maamuleed ee hoos ku qoran.

**Kharashka aad bixineysid marka aa amaahanaysid qalab gargaar**

Inta badan qalabka gargaarka ah sida gaarka ah lagugu qoro ee gobolka Västra Götaland waa lacag la'aan in la amaahdo. Waxa aad adigu iska bixineysid waa:

- alaabooyinka laga iibsan karo suuqa guud, tusaale ahaan battariyada iyo nalalka
- kharashyada shaqada,sida  tusaale ahaan korontada
- qaadidda qalabka gargaarka inta lagu jiro xilliga amaahda
- dayactirka inta lagula maqanyahay dibadda dalka
- Markii loo baahdo,dib u soo celinta lakabyada dusha sare ah ka dib marka lakala furfuro qalabka gargaarka oo horay ugu dhaganaa dhulka,darbiyada,saqafka,alaabta guriga iyo wixii lamid ah.
- alaabta lagu xidho qalabka gargaarka aad amaahatay marka ay jirto baahi loo qabo

**Haddii aad qorsheyneyso inaad guurto ama aad maqnaato waqti dheer**
La xidhiidh qaybta maamuleed ee hoos ku qoran wakhti fiican si aad u hesho macluumaad ku saabsan xeerarka khuseeya haddii aad qorshaynayso inaad guurto ama maqnaato wakhti dheer.

**Goorta la soo celinayo qalabka gargaarka**
Qalabka gargaarka waa in lagu soo celiyaa sida ugu dhaqsaha badan, iyadoo dhamaystiran oo si fiican loo nadiifiyay, marka aadan u baahnayn ama marka lagu weydiiyo inaad soo celiso. Fadlan la xidhiidh alaab-qeybiyaha/qeybiyaha ama qaybta maamuleed ee hoos ku qoran si aad u hesho macluumaadka ku saabsan sida iyo meesha lagu soo celinayo qalabka gargaarka.

**Waxaa laga yaabaa inay waajib kugu noqotay magdhow haddii:**
- Qalabka gargaarka loo isticmaalin si waafaqsan tilmaamaha isticmaalka
- Tilmaamaha gaarka ah ee qalab-bixiyuhu oo aan la raacin
- Qalabka gargaarka oo aan la dayactirin ama la nadiifin si waafaqsan tilmaamaha isticmaalka
- Qalabka gargaarka oo loo arko in uu dhaawacanyahay si ka baxsan duugoobidda caadiga ah
- Lumisid qalabka gargaarka
- Qalabka gargaarka aan la soo celinin ka dib codsi ka yimid daryeel-bixiyaha
- aad dhaawacday qalabka gargaarka, tusaale ahaan waxaad ku dhejisay calaamad ama rabadh xumbo oo kale ah ama rinjiyeysay qalabka gargaarka
- aad ku dhejisay jillaaboyin ama waxyaabo kale qalabka gargaarka ah
- aad ku dhejisay ama waxaa isku dartay agab (oo ay ku jiraan software-ka) iyo qalab dheeraad ah ama qalabyo gargaar oo gaar loo leeyahay iyo qalabka lasoo amaahday

**Iska hubi caymiskaaga difaaceed**
Haddii aad soo amaahato qalab qaali ah, daryeel-bixiyaha caafimaadka wuxuu kugula talinaya inaad dib u eegto caymiskaaga maadaama aad mas'uul ka tahay qalabka gargaarka ilaa inta uu kugu qoranyahay qalabka.

**Waafajinta baabuurka baahiyaha oo lagu daray kursiga curyaanka ee gacanta laga qabo ama korontada ku shaqeeya**
Haddii ay taagantahay baahida ah in la waafajiyo baabuurka baahiyaha iyo kursi-curiyaaneedkaaga, waa inaad la xiriirtaa qalab-bixiyahaaga ka hor intaysan bilaabin shaqada waafajinta. Tani waa si uu qalab-bixiyahaaga ula xiriiro alaab-qeybiyaha/qeybiyaha qalabka gargaarka si loo baaro khatarta si wadajirka ah.

**Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, la kulantid shil ama shil qalabkaaga gargaarka ah, la xiriir qaybta daryeelka ee halkan ku qoran:**

| |
|---|
| *Qor magaca qaybta maamuleed iyo macluumaadka xiriirka.* |

**Ama, raadi macluumaadka xiriirka ee qaybta daryeelka, tusaale ahaan qaybta baxnaanintu ama xarunta daryeelka iyada oo loo marayo bogga** www.1177.se/Vastra-Gotaland/hitta-vard/
QR-kod: 1177/hitta vård

**Alaab-qeybiyaha/qeybiyaha ee qalab gargaarkaan gudaha Gobolk Västra Götaland waa**

- ☐ Xarunta Qalabka Gargaarka, 010-473 80 80
- ☐ Xarunt Aragga ____________________
- ☐ Xarunta Maqalka ____________________
- ☐ Kooxda maqal iyo arag la'aanta ____________________
- ☐ Farsamada lafaha ____________________
- ☐ Alaabaha u dhow daawooyinka , 010-441 31 90